# Wakhtiga loo qabtay tababarka shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed ee la iskaga baahan yahay

Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon waxay xaqiijinaysaa adeegyada daryeelka guriga oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo dadka naafada ah. Shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed, oo ay ku jiraan shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed, ayaa bixiya adeegyada daryeelka guriga. Shaqaalahani waxay dadka waaweyn iyo dadka naafada ah ka caawiyaan in ay guryahooda iyo bulshooyinkooda dhexdiisa ugu noolaadaan si badbaado iyo madax bannaani leh.

## 2020

### Tababarka tijaabada ah

Tababarka ee Carewell SEIU 503 oo bilawday tababar tijaabo ah. Kuwa ka qayb qaata tababarka tijaabada ah waxay helaan credit marka tababar la iskaga baahan yahay 2021.

## 2021

### Tababarka iyo qiimeynta la iskaga baahan yahay

**Tababarka iyo qiimeynta la iskaga baahan yahay ayaa bilaabmaya.**

- Sibtambar 1, 2021 Shaqaalaha cusub oo dhan waa in ay qaataan jihayn 'orientation' ka hor inta aysan isku qorin shaqaale ahaan oo ku dhammeystaan tababarka muhiimka ah muddo 120 maalmood gudahood ah ee isqoritaanka.
- Maarso 31: Dhammaan shaqaalaha isqoray ka hor 9/1/21 i waa in ay dhammeystaan tababarka dib u eegista si ay u sii wataan shaqada.

## 2023

### Sii wadashada waxbarashada

**Shaqaaluhu waa in ay qaataan 12 saacadood oo ah** sii wadashada waxbarashada 24 bilood ee kasta.

# Mawduucyada tababarka loo baahan yahay

## Shaqaaluhu waa in ay qaataan:

- **Tababarka**
- **Tababarka muhiimka ah**
- **Sii wadashada waxbarashada**
- **Tababarka dib u eegista** (shaqaalaha isqoray ka hor 9/1/2021)

## Wixii macluumaad dheeraad ah la xiriir:

**Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon**
**https://go.usa.gov/xdXrF**

**Carewell SEIU 503 Training**
**https://www.carewellseiu503.org/training**

## Mawduucyada tababarka waxaa ka mid ah:

- Xadgudubka iyo soo sheegista waajibka ah
- Qarsoodinimada
- Xuquuqda macmiilka
- Maareynta daawooyinka
- Badbaadada daawada
- Ka hortagga musuqmaasuqa Medicaid
- Daryeelka gaar ahaaneed iyo iska taageerida nolol maalmeedka
- Adeegyada iyo taageerada qofka ku saleysan
- Tallaabooyinka dhanka ammaanka iyo xaaladda degdega ah
- Taxadarada caalamiga ah
- Shuruudaha, doorarka iyo mas'uuliyadaha
- Sida loo taageero baahiyaha dhanka jirka iyo dareenka ee dadka hela adeegyada
- Shuruudaha loogu talagalay daryeel bixiyayaasha dhaqaalahooda lagu bixiyay lacagta Medicaid

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon kala xiriir 877-624-6080. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

DHS Oregon Department of Human Services | Oregon Health Authority

Oregon Home Care Commission | Carewell SEIU503 Training

DHS 2519B (11/8/2021) Somali